

**Magaca musharaxa:** Ry Armstrong (iyaga/iyaga)

**Magaca Ololaha:** Armstrong ka Dhammaan

**Websiteka ololaha:** armstrongforall.com

**Booska Magaalada:** Duqa Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** +1 206-657-6287

Bartamaha Seattle, waxaan u taaganahay qabanqaabiyaha shaqaalaha, anigoo raacaya wadadii qoyskayga. Marna kamaan cabsan tartan. Waxaan sanado ku qaatay u halgamida xuquuqda shaqaalaha, guriyo la awoodi karo, iyo fanka. Anigoo ah La-Agaasimaha Fulinta ee Sustainable Seattle, waxaan u shaqeeyaa magaalo nadiif ah, cadaalad ah oo ilaalinaysa kuwa noogu nugul. Muddo shan sano ah, waxaan la abaabulay ururrada shaqaalaha oo waxaan hadda ka shaqeeyaa Golaha Qaranka ee AFL-CIO ee AEA, oo matalaya 50,000 oo shaqaale hal abuur leh si ay ugu halgamaan mushahar caddaalad ah, badbaado, iyo dheefo. Wakhtigii aan ka tirsana Seattle LGBTQ Commission iyo sannadaha u doodista ayaa i baray sida dawladda magaaladu u shaqeyso. Waxaan rumaysanahay in gaadiidka dadwaynuhu uu bixiyo qiimo dhimis ama Safar bilaash ah si loo caawiyo qoysaska shaqeeyaa inay u socdaalaan guud ahaan magaaladeena oo ay yareeyaan qiiqa si looga hor tago isbedelka cimilada. Waxaan qorsheynayaa inaan ku daro 1,000 sariirood oo hoy ah Gabaadka (Shelter) 100 ka maalmood ee ugu horreeya. Beddelidda shuruucda isticmaalka dhulka waxay naga caawin doontaa inaan dhisno xarumaha daryeelka carruurta oo aan Seattle ka dhigno mid xooggan. Dib uga noqon maayo 2025-magaaladayadu waxay diyaar u tahay inay u dagaalanto mustaqbal wanaagsan. Waxaan kaa codsanayaa taageeradaada. Aan dadka siino mudnaanta hore. Wadajir!

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Bruce Harrell

**Magaca Ololaha:** Bruce ee Seattle

**Bog-khadka ololaha:** BruceforSeattle.com

**Jagada:** Duqa Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-569-8486

Sharaf bay ii tahay in aan ku adeego ahaanshaha Duqa magaaladaada! La shaqaynta shaqaalaheenna magaalada, waxaa naga go'an Seattle oo ammaan ah, la awoodi karo, oo soo dhawaynaysa dhammaan.

Waxaan ku faanayaa guulahayga ilaa hadda:

● Diiwaangelin maalgelinta guryaha la awoodi karo, oo ay ku jiraan guryaha taageerada kuwa aadka u nugul, iyo kumanaan guri oo loogu talagalay dadka shaqeeya iyo qoysaska.

● Horumarinta amniga dadweynaha oo ay ku jiraan shaqaalaha booliiska Seattle; abuurista Kooxda DARYEELKA oo si naxariis leh, gurmadka aan hubaysnayn oo la siiyo kuwa u baahan; iyo maalgelinta badbaadada dhalinyarada iyo ka hortagga rabshadaha qoryaha.

● Waxkaqabad cimilo oo degdeg ah si dhismayaasha looga dhigo kuwo nadiif ah, loo hagaajiyo marin-u-helidda iyo waddooyinka nabdoon, balaarinta goobaha korontada EV, iyo beeridda kumanaan geedo cusub ah.

● Diirada saaraa adeegyada aasaasiga ah- hagaajinta waddooyinka, ogolaanshaha la hagaajiyay, iyo taageerada ganacsiyadayada yaryar ee firfircoon.

Boonooyinkaaga iyo codadkaaga ay weheliso, horay ayaan u socon doonnaa!

●Kordhinta guryaha la awoodi karo – laga bilaabo guryo qoysaska ku habboon oo ku dhow dugsiyada ilaa guryo dabaqyo ah iyo koondhooyinka ee si fudud looga heli karo gaadiidka dadweynaha; waa inaan kordhinaa fursadaha helitaanka, yareynaa kharashaadka, oo aan abuurnaa fursado hanti (dhaqaale) jiilba jiil u gudbiyo.

● Horumarka amniga- qorista SPD, Ballaarinta Kooxda CARE, dhimista rabshadaha, iyo wax ka qabashada fentanyl iyo isticmaalka muqaadaraadka.

● Dar-dargelinta mustaqbalka Seattle– Tareenka fudud ee West Seattle ilaa Ballard, dhamaystirka Waterfront iyo dib u qaabeynta Seattle Center,soo celinta bartamaha magaalada si ay u gaarto sharaftii dhabta ahayd ee Emerald City.

Waxaan codsanayaa taageeradaada oo sii socota.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



Magaca musharaxa: Joe Mallahan

Magaca ololaha: Mallahan u dooro Duqa Magaalada

Bog-khadka Ololaha:
www.joemallahanforseattlemayor.com

Jagada: Duqa Magaalada Seattle

Lambarka Telefoonka Ololaha: 206.229.8149

Waxaan u tartamayaa Duqa magaalada sababtoo ah waxaan aaminsanahay in Seattle ay ku noolaan karto rabitaankeeda. Iyadoo ay jirto dawlad magaalo oo aad u hufan, Seattle waxay noqon kartaa tusaale horusocod u ah qaranka-iyo xoog ka hortaga fowdada iyo naxariis darada MAGA.

Duqa magaalada anoo ah, waxaan ka dhigi doonaa magaalada mid noo shaqaysa dhamaanteen. Waa inaan si weyn u wanaajinaa badbaadada dadweynaha—iyada oo ay jirto kor joogtayn boolis oo dhab ah iyo dib u dhiska kalsoonida bulshada. Waxaan dhamaystiri doonaa 50 roondo-raacid sanadka ugu horeeya si aan ula socdo waxa run ahaantii ka dhacaya jidadkeena.

Waxaan jari doonaa Khadka cas, waxaan dardargelin doonaa Mashariicda guryaynta, waxaanan maalgelin doonaa mashaariicda u adeega qoysaska shaqeeya. Waxaan ka faa'iidaysan doonaa Lacag-celinta canshuurta federaalka si aan u dhiso guryo la awoodi karo, anoo ballaarinaya helitaanka caafimaadka maskaxda iyo daaweynta balwadda, oo aan bixiyo 5,000 oo sariirood oo degdeg ah sanadkayga ugu horreeya-ma daaweyn kartid balwadda marka dadku ku nool yihiin waddooyinka.

Waxaan aha wakiil isbeddel xirfadeyda oo dhan-oo Badbaadiya ganacsiyada dhexdhexaadka ah anigoo garab siinaya lana shaqeynaya shaqaalaha safka hore. T-Mobile-ka, waxaan dhageystay wakiillada adeegga macaamiisha waxaanan siiyay qiimo dhimis iyo heerar hoose malaayiin qoys oo dakhligoodu hooseeyo. Anigoo ah abaabule bulsho, waxaan isu keenay dadka si aan u xalinno dhibaatooyinka waaweyn ee magaalada.

Waxaan wax uga qaban karnaa guri la'aanta si naxariis leh, waxaanan ka dhigi karnaa Seattle mid ammaan ah oo la awoodi karo.

*Musharaxani kama qayb galayo Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada*.



**Magaca musharaxa:** Joe Molloy

**Magaca Ololaha:** Joe Molloy u dooro Duqa Magaalada

**Bog-khadka ololaha:** joemolloyformayor.com

**Booska Magaalada:** Duqa Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-590-1126

Waxaan ahay Joe Molloy - u doodaha guryeynta iyo Naafada, hab-fekerka aragti-arag, iyo hoggaamiye ay qaabaysay waayo-aragnimada nololeed ee safka hore ee nidaamyada jabay.

Anigu ma ihi siyaasi xirfad leh, laakiin waxaan ahay shaqaale dawladeed - oo ay dhaqaajiso dareen qoto dheer oo degdeg ah. Waxaan u ordayaa inaan wax ka qabto, oo aan ugu dambeyntii soo afjaro, dhibaatada hoy la'aanta ee ku habsatay magaaladeena.

Waxaan si bareer ah ugu soo guuray Seattle, anigoo rumaysan inay tahay mid ka mid ah meelaha dhawrka ah ee aduunka oo aan si buuxda isu muujin karo. Waan ogahay in qaar badan oo kale ay ugu yeeraan magaaladan hooy sababtaas mid la mid ah. Haddana dhamaanteen waxan ognahay - in nidaamyadeenu aanay ku habboonayn fikradahayaga.

Laakiin way noqon karaan - haddii aan diyaar u nahay oo ay naga go'an tahay.

Ololahayagu ma aha oo kaliya wax ka qabashada hoy la'aanta - waa dhisidda magaalo leh adeegyo bulsho oo loo dhan yahay oo dhammaystiran oo *suurtogalnimada* in guri la'aani dhacdana ay meesha ka baxdo. Waxaan aaminsanahay in aan noqon karno magaalada jidkaas hogaaminaysa. Taasi oo tusaale u noqota dhammaan kuwa kale.

Haddii aan xalino hoy la'aanta, kaliya ma hagaajinayno hal dhibaato ee- waxaan aasaaska u dhigaynaa mustaqbal badbaado leh, waara, oo ay ka buuxaan fursado.

Taasi waa waxa aan halkan u imid si aan u abuuro-waana sababta aan u codsanayo taageeradaada.

*Musharaxaan wuxuu ka qeyb-galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa:**Katie Wilson

**Magaca Ololaha:** Wilson oo ordaya Seattle

**Bog-khadka Ololaha:**wilsonforseattle.com

**Booska Magaalada:** Duqa Magaalada Seattle

**Taleefanka Ololaha:**607- 301 - 1836

Magacaygu waa Katie Wilson waxaana u tartamayaa inaan noqdo duqa cusub ee Seattle.

Waxaan 14-kii sano ee ugu dambeysay aan ku bixiyay xirfadayda dhisidda iyo hoggaaminta iskaashi iyo guulo waaweyn oo keenay in qoysaska shaqeeya: mushahaar ugu yar oo ka sarreeya, ilaalin xooggan oo loogu talagalay kiraystayaasha, guryo la awoodi karo oo badan, gaadiid dadweyne oo wanaagsan, iyo canshuuro lagu soo rogay kuwa awooda dhaqaale leh inay bixiyaan saamigooda halkii laga qaadi lahaa annaga oo horeyba u bixinaynay wax badan. Waxaan ogahay sida dadka loo mideeyo iyagoo kala duwan si loo gaaro guulo waaweyn.

Duqa hadda jira wuxuu ahaa siyaasi Golaha Magaalada tan iyo 2008. Intii lagu jiray waqtigaas, qiimaha kireynta ama iibsiga guri gudaha Seattle wuu laba jibbaarmay, waxaana sii kordhay tirada dadka aan hoy laheyn ee ku nool waddooyinkeena.

Arrintu sidaan kuma qasbana inay ahaato.  Waxaan u dhisi karnaa guryo dhammaanteen. Waan yeelan karnaa xaafado firfircoon oo lagu noolaan karo. Waan yeelan karnaa ganacsiyo yaryar oo kobcaya. Waan yeelan karnaa wadooyin dadka u muuqda kuwo ammaan ah sababtoo ah waxay yihiin kuwa ammaan ah. Waan ilaalin karnaa bulshooyinka soo galootiga ah oo waxaanu fursad u abuuri karnaa dhammaanteen. Arintan waxaan ku qaban karnaa si wadajir ah.  Balse Seattle waxay u baahan tahay hoggaamin cusub.

Tani waa magaaladeenna.  Waxaan rabaa inaan awooddiina iyo codkiina keeno Xarunta Magaalada.  Igala soo qaybgal, oo aanu hawsha qabano.

*Musharaxan ayaa ka qeyb galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa:** Ann Davison

**Magaca Ololaha:** Deriska ee Ann

**Mareega (Boga) Ololaha:** https://neighborsforann.com/

**Jagada Magaalada:** Musharaxa Qareenka Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** (206) 257 - 2206

U adeegida sidii Qareenka Magaalada Seattle tan iyo 2022 waxay ahayd sharaf aad u weyn, waxayna igu dhiirrigelisay inaan sii wado diirad-saarka hagaajinta amniga dadweynaha ee Seattle.Haddii ay tahay dadaalkayga lagu soo celinayo isla xisaabtanka waqtiga-dhabta ah ee nidaamka caddaaladda dambiyada fudud, la shaqaynta sharci dejinta ama golaha magaalada si aan u hormarinno shuruucda ama shaqada dawladeena, waxaan diirada saaray sidii aan nidaamkeenu ugu shaqayn lahayn si hufan si loo gaarsiiyo dadweynaha. Waxaan keenay sharci lagu ilaalinayo goobaha guud ee magaaladeena iyadoo aan laga fogaan goobaha daroogada iyo goobaha dhilleysiga, si loo carqaladeeyo shabakadaha dambiyada ee beegsanaya dadka nugul.taasoo carqaladaynaysa ganacsiyada dambiyada ugaadhsada dadka nugul. Waxaan joogaa meesha ugu saraysa ee xafiisyada xeerilaalinta oo leh daah-furnaan xog oo aan horay loo arag iyo helitaanka bulshada si dadweynaha loogu sheego shaqadayda iyo sababaha go'aamadayda. Anigoo ka duulaya ujeeddo badbaado dadweyne, waxaan dacweeyay kuwa baabuurta sameeya oo gawaadhidooda ugu raqiisan suuqyada soo galiyay iyagoo khatar aad u wayn ugu jira in la xado. Waxaan Seattle soo geliyay 160M si aan u nadiifiyo deegaanka Duwamish, magdhawgii hal magaalo ee ugu weyn dalka oo ka yimid shirkadda weyn ee kiimikada. Waxaan halkaan u joogaa inaan ilaaliyo Seattle iyo sharcigeeda mana daali doono ama joojin maayo sinaba haddii dib la ii doorto.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Erika Evans

**Magaca Ololaha:** Dooro Erika Evans

**Bog-khadka Ololaha:** www.ElectErikaEvans.com

**Booska Magaalada ee uu u tartamayo:** Xeer

Ilaaliyaha Magaalada

**Iimeelka ololaha:** info@ElectErikaEvans.com

Waxaan u tartamayaa inaan noqdo Qareenka Magaalada Seattle ee soo socda sababtoo ah waxaan jeclahay magaaladan-oo waxaan ogahay inaan sidaan ka sii wanaajin karno. Waxa aan ku dhashay guri ku qotoma xuquuqda madaniga ah iyo dhaqaalaha, waxaanan ku noolaa halgankii soo food saartay in badan oo ka mid ah bulshooyinkeenna . Waxaan xirfadayda ku qaatay difaacidda xuquuqdeena iyo samaynta sharciyo dadka ka dhiga kuwo nabadgala.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee ka soo shaqeeyay labada qaybood ee dambiyada iyo madaniga ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle. Waan aqaan sida xafiiskaan u shaqeeyo-iyo sida loo keeno isbeddel dhab ah. Ka garsoore ahaan si meel-ku-gaar ah ee maxkamadda magaalada, waxaan arkay sida la xisaabtanku u egyahay. Xeer-ilaaliye federaal ahaan, waxaan tilaabo ka qaaday loo-shaqeeyayaasha xaday mushaarrada, maxkamadeeyay dembiyada nacaybka, la xisaabtamay tahriibiyeyaasha qoryaha iyo fentanyl, oo u istaagay dhibanayaasha rabshadaha.

Badbaadada dhabta ah waxay ka macno weyntahay xabsi-dhigis. Waxay ka dhigan tahay isla xisaabtan naxariis leh, ilaalinta muruqmaalka iyo bey'adda, xorriyadda taranka, iyo xalalka dhabta ah ee u dhigma xabsi-gelinta. Taasi waa sababta aan ugu guuleysan doono Maxkamad Bulsheed cusub oo diiradda saareysa baxnaaninta - ma ahan albaabbada wareega.

Waqti xuquuqdeenna ay weerar ku yihiin maamulka Trump, waxaan u baahannahay Xeer-ilaaliye Magaalo oo leh khibrad, laf dhabar, iyo aqoon uu kula dagaalamo—oo hogaamiya maalinta koobaad. Diyaar baan ahay.

*Musharaxaan wuxuu ka qeyb-galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca musharraxa:** Rory O'Sullivan

**Magaca Ololaha:** Saaxiibada Rory O'Sullivan

**Websiteka Ololaha:** www.electrory.com

**Booska Magaalada ee uu u tartamayo:** Xeer Ilaaliyaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-356-9852

Magaalada Seattle waxay u qalantaa Qareen mudnaanta siinaya ka dhigista magaaladeena mid amaan ah. Dhamaanteen waxaan nahay kuwo kaso- horjeeda dambiyada, laakiin kasoo hor-jeed kaliya inaguma filna. Waxaan wali sugeynaa xalalka.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada waxa uu xidhay maxkamada Bulshada, waxa uu doortay dagaal uu la galay garsoorayaal la soo doortay, waxa uu ogolaaday in dadka iyago cabsan Baabuurta kaxeeya dacwad oogistoodu noqdaan buufin ilaa 85 maalmood, waxba ma samayn marka la eego amarada fulinta ee aan sharciga waafaqsanayn, waxa aanay ku guuldaraysteen in ay abuuraan magaalo amaan iyo naxariis badan oo ay balan qaadeen in ay abuurayaan.

Waxa aan xirfadayda ku qaatay u dagaalanka shaqaalaha, ano hubinaya in si cadaalad ah loo galo nidaamkayaga sharciga, waxaan laha wada shaqayn firfircoon. Waxaan diyaar u ahay inaan hogaamiyo xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada kaasoo riixaya xal u helida dhibaatooyinka soo wajaha Seattle.

Waxaan dib u soo celin doonaa maxkamadda bulshada iyada oo la wanaajiyey raadraaca si aan u bixiyo fursad aan kaga baxsado wareegga dembiga, dedejiyo dacwad-ku qaadidda rabshadaha qoyska iyo wadista sakhraansan si aan u joojino sugitaanka dib -u-soo noqoshada dembiyada, xoojinta heerarka shaqada ee xooggan si looga ilaaliyo shaqaalaha in loola dhaqmo si xun shaqada, iyo abuurista xafiiska qareenka magaalada oo karti leh - diiradana saaraya maamul wanaag.

Taageerada: Guddoomiyaha Caymiska Patty Kuderer, Senetarka Gobolka Rebecca Saldaña, Wakiilada Gobolka Chipalo Street iyo Sharon Tomiko Santos, Xubnihii hore ee Golaha Magaalada Tammy Morales iyo Mike O'Brien, Seattle Dispatchers' Guild, iyo in ka badan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Adonis Ducksworth

**Magaca Ololaha:** Adonis for Seattle

**Mareegta Ololaha:** [AdonisForSeattle.com](AdonisForSeattle.com)

**Booska Magaalada:** Booska 2aad ee Golaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-495-5597

Waxaa isoo korisay hooyo keligeed ah oo ku jirta saddex dabaq oo ku yaal Beacon Hill. Xusuus wacan ayaan u leeyahay la ciyaarista asxaabta xaafadda oo dhan. Guryaha la awoodi karo ee u dhow dugsiyada iyo adeegyada ayaa muhiim u ahaa xasilloonidayada.

Maanta, dadku waxay ka walwalaan rabshadaha qoryaha, inaysan awoodin inay iska bixiyaan kirada guryaha, qiimo aysan awoodin dartiis ku waayeen guryahoodii, iyo fursado la'aanta carruurta.

10kii sano ee la soo dhaafay, waxaan u shaqaynayey sidii wacyigeliye, ka qaybqaadasho, iyo xirfadle siyaasadeed ee Magaalada Seattle. Magaalada oo dhan waxaa aan khibrad u leeyahay sida dadka la iskugu keeno si wax loo qabto.

Waxaan u ordayaa sababta ah in aan ogahay in aan wax wanaagsan u qaban karno bulshadeena.

Codkaaga oo aad i siiso, waxaan ku heli doonaa natiijada aan u qalano:

- Ikhtiyaarada guryeynta ka wanaagsan dadka raba inay ku noolaadaan Southend; fursado badan oo loogu talagalay dadka raba inay ku nagaadaan guryahooda iyo xaafadooda.
- Saraakiisha booliiska oo lala xisaabtami karo, balaadhinta jawaabayaasha Kooxda CARE, iyo maalgelinta faragelinta waxay yaraynaysaa rabshadaha hubka iyo ilaalinta carruurta iyo ganacsiyada yaryar.
- Dhisida guusha Canshuurta Gaadiidka, waxaan ka shaqayn doonaa in aan Xawaaraha baabuurta hoos u dhigo Rainier iyo MLK, ka dhigo gaadiidka mid badbaado leh oo la isku halayn karo, oo ay helaan dhamaan isticmaalayaashu gaadiid badbaado leh, la sii saadaalin karo, iyo doorashooyin hufan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeyb-qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharraxa:** Eddie Lin

**Magaca Ololaha:** Eddie ee Seattle

**Website-ka ololaha:** https://www.linforseattle.com/

**Booska Magaalada:** Booska 2aad ee Golaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-734-7412

Isago ahaa Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Magaalada ee Xafiiska Guriyeynta, Eddie waxa uu ka shaqaynayay sanado badan si uu u caawiyo maalgalinta kumanaan guri oo la awoodi karo. Waxa uu aaminsan yahay in dhimista kirada cirka isku shareertay ay tahay mudnaanta koowaad. Eddie waxa uu si hagar la'aan ah uga shaqayn doonaa sidii uu wax uga qaban lahaa ka saarista aagagga ee so jireenka ah, dib-u-dhiska, iyo maalgelin la'aanta nidaamsan ee culayska saartay magaaladeena muddo tobanaan sano ah, gaar ahaan Koonfurta Dhamaadka.

Eddie waa wiilka soogalooti Taiwanese ah wuxuuna la kulmay takoor intii uu ku soo korayey North Carolina. Waxa uu ku tiirsanaa deeqo waxbarasho, kaalmo lacageed, wuxuna ka shaqaynayay shaqooyin badan si uu u bixiyo kharashka Jaamacadda. Wuxuu ahaa rinjiile guri, nadiifiye kaniisad deegaanka ah, iyo dire fariin baaskiil. Sida dadka ku cusubi cadeeyeen: "Dhibaatada awoodis laanta guryaha ee Seattle kuma cusba Eddie, wuuna la noolaa."

Eddie wuu ordayaa sababtoo ah wuxu ka niyad jabay deg-deg la'aanta wax ka qabashada caqabadaha ugu adag Seattle. Haddi ay tahay badbaadada dadwaynaha, Guryaha la awoodi karo, guri la'aanta, ama dugsiyada dawlada ee daalaa dhacaya, waxa uu diyaar u yahay in uu is xil qaamo oo uu sameeyo horumar la taaban karo.

Eddie wuxuu aaminsan yahay in Seattle ay tahay meel qof walba uu leeyahay- waana sababta uu u taageerayo canshuuraha shirkadaha hodanka ah iyo tujaarta si loo maalgeliyo adeegyada muhiimka ah ee aan ku tiirsannahay.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



Magaca musharaxa: Jesse A. James

Magaca Ololaha: Jesse A. James for Seattle

Bog-khadka ololaha: jesseajames.com

Booska Magaalada: Booska Golaha Magaalada ee 8aad

Lambarka Telefoonka Ololaha: (206) 657-7062

Anoo ah muusikiiste/qoraa si toos ahna u garanaya halganka shaqada iyo kiraynta guryaha ee Seattle, mudnaantayda ugu weyn ee xubin golaha deegaanka ah waxay noqon doontaa sidii Seattle u noqon lahayd mid ammaan ah oo qof walba awoodi karo.

2022-kii, waxaan Congress-ka ugu tartamay madal ku salaysan dib u habaynta cashuuraha iyo difaaca xuquuqda taranka. Waxaan ku biiray Xisbiga Cascade ee cusub 2024, waxaana la ii doortay Guddigiisa ka dib dadaal dheer oo lagu kordhinayo xorriyadda hadalka iyo daryeelka caafimaadka ee guud ahaaneed barnaamijkooda.

Waxaan aaminsanahay in aragtida siyaasadeed ay dib u dhigto waxqabadka iyo bulshada marka ay timaaddo dawladda hoose. Tani waa meesha isbeddel dhab ah uu ka dhaco.

Siyaasadda federaalku waa fowdo, waxaanan u baahannahay xasilloonida dawlad hoose. Seattle waxay horumar ka samaysay labadii sano ee la soo dhaafay xagga amniga iyo guryeynta dadweynaha, iyadoo sidoo kale ku ilaalinaysa magaaladeena soo jiidashada ganacsiga. Waxaan ku noqon karnaa Bulsho wanaagsan anagoo bixina barnaamijyo bulsheed oo naxariis leh, iyo anagoo sidoo kale taageerna milkiilayaasha ganacsiga yaryar.

Waxaan aqbalay sii wadida balaadhinta tareenka fudud. Waxaan ahay u doode baabi'inta Canshuurta Sonkorta. Siyaasadahani waxa ay ku shaqaynayaan hadafkayga, kaas oo ah in aan golaha ku soo kordhiyo isla xisaabtan iyo isku dheeli tirnaan, waxaanan u imid in aan hawshas qabto.

Waxaa taageeray Krist Novoselic iyo wax badan.

*Musharaxani kama qayb galayo Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada*.




Magaca musharaxa: Rachael Savage

Magaca Ololaha: Saaxiibada Rachael Savage - Golaha Magaalada

Bog-khadka ololaha: http://www.savageforseattle.com

Booska Magaalada: Booska Golaha Magaalada 8aad

Lambarka Telefoonka Ololaha: (206) 657-7062

Milkiile ganacsi oo reer Seattle ah ahaan waxaan ku qasbanaaday inaan la noolaado cawaaqibka ay sababaan siyaasiyiinta burburinaya nidaamkayaga cadaalada dembiyada, u oggolaanaya dembiyada, balwadda iyo jirrooyinka dhimirku inay sababaan dhimasho, burburka ganacsiyadayada iyo quruxda magaalada hoose iyo dareenka badbaadada muwaadin kasta. Degane ahaan waa inaan la dagaalamo kirada mar kasta sii kordheysa oo aan la kulmay iyo qiimaha guryaha la iibinayo oo aanan awoodin. Hadii aan ka mid noqdo golaha, hadafkaygu wuxuu noqon doonaa inaan kuu adeego anigoo gudbinaya siyaasad wax ku ool ah oo xiraysa farqiga mushaarka iyo kirada, dib u dhisaysa waaxdayada booliiska, sugaysa xabsiga magaalada, fasaxo xadhiga iyo xabsiyada iyo dhisitanka xarumaha daawaynta ee muddada dheer si loo xalliyo cudurada faafa ee daroogada iyo cudurada dhimirka.

Waxaan sameyn karnaa si ka wanaagsan. Muwaadin kasta waxa uu leeyahay rabitaan isku mid ah, in si cadaalad ah loogu dhaqmo sharciga iyo in uu ku noolaado Bulsho nabad ah, xasilloon, oo barwaaqo ah. Nabadgelyadu waxay ganacsi iyo barwaaqo ku soo celin doontaa magaaladeenna. Waan wada sameyn karnaa tan. Hadaad codkaaga i siiso, waxaan ku matali doonaa dadka aan la dhegeysan jirin, codka caqliga saliimka ah, codka midaysan, kana soo horjeeda xaaladaha taagan oo inta badan aan ku fashilannay. Foojarrada dimoqraadiyadu waxay caawiyaan maalgalinta dadka dibadda ka jooga nidaamka. Ku taageer ololahayga boonooyinka dimuqraadiyadda maanta.

Musharaxaan wuxuu ka qeyb-galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.



**Magaca musharaxa:** Dionne Foster

Magaca Ololaha: Dionne ee Seattle

**Boga-khadka ololaha:** dionnefoster.com

Jagada Magaalada: Jagada #9 ee Golaha Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-651-5493

Waxaynu mudannahay waddooyin nabdoon, guryo la awoodi karo, iyo hogaamiyayaasha Seattle oo ilaaliya xuquuqdeena oo ixtiraamaya codkeena.

Dionne Foster waa khabiir siyaasadeed, hogaamiye bulsho, shaqaale bulsho oo tababaran, iyo hooyo ku qaadatay in ka badan toban sano ka dhigista bulshooyinkeena kuwa badbaado leh, sii waaraya, iyo sinnaan. Waxay u sharaxan tahay Golaha Magaalada si ay u dhisto diiwaankan hogaaminta wanaagsan - dib u jahayna Golaha si ay wax uga qabataan arrimaha mudnaanta leh ee la wadaago iyo baahiyaha degdega ah, ma aha ajendhayaasha gaarka ah.

Intay ahayd Agaasimaha Fulinta ee WA Progress Alliance, waxay ka caawisay gudbinta iyo ilaalinta maalgashiga taariikhiga ah ee daryeelka ilmaha, waxbarashada hore, iyo dhismaha dugsiga iyada oo u maraysa hoggaankeeda ku aaddan canshuurta shirgadaha waaweyn ee gobolka oo dhan - iyadoo hubinaysa in dadka hodanka ah ay bixiyaan saami cadaalad ah iyo wax ka qabashada kharashaadka iyo maalgelinta baahiyaha.

Intay ahayd Lataliyaha Siyaasadda Sare ee Magaalada Seattle, Dionne waxay maareysay ka qaybgalka daneeyayaasha si loo horumariyo badbaadada dadwaynaha, loogu abuuro fursado dhalinyarada, loona gaadho yoolalka cimilada. Intay joogtay Seattle Foundation, waxay maalgelisay ururrada abuuraya xeelado guriyeynta cusub iyo horumarinta dhaqaalaha.

Taageeradaada, Dionne waxay gacan ka geysan doontaa isu keenida Seattle si ay wax uga qabato caqabadaha qaranka oo ay u wado horumarka maxalliga ah si ay u caawiso qof walba inuu dareemo nagadgeylo, soo dhawayn iyo taageero magaaladeena. Dionne waa musharaxa kaliya ee tartankan ay ansixiyeen Golaha Shaqaalaha MLK.

*Musharaxan ayaa ka qeyb galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca musharaxa:** Sara Nelson

Magaca Ololaha: Sara Nelson ee Golaha Magaalada

Boga ama mareegta ololaha: SaraForCityCouncil.com

**Jagada:** Jagada 9 Golaha Magaalada Seattle Guud

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-821-6140

Waxaan ahay Sara Nelson, Xubin golaha magalaada oo dhan.

Afar sano ka hor, Seattle waa ay xayirneed (horomar majirin) - wajaheysay dambiyo sii kordhaya, xeryo ku yaal jardiinooyinkeena, iyo Golle u muuqday inuu aad u xiisaynayo inuu sameeyo hadallo halkii uu hormar sameyn lahaa. Waxaan u orday inaan taas beddelo.

Maanta, ugu dambeyntii waxaan bedeleynaa jihada. Seattle waxay shaqaaleysiinaysaa ciidanka booliiska ka badan intii aanu luminay markii ugu horeysay tan iyo 2019. Waxaan si toos ah wax uga qabanaynaa faafida fentanyl-ka annagoo ballaarinayna iskaashiga aan la leenahay Evergreen Treatment Services (Adeegyada Daaweynta Evergreen) ee keena daawaynta wareega iyo taageerada tooska ah dadka la halgamaya balwadda isticmaalka opioid. Oo markii meheradaha xaafadu ay wajaheen jabin, waxaanu samaynay Sanduuqa Dayactirka Dukaamada si aanu uga caawino inay kasoo kabtaan kharashkooda.

Qof kastaa wuxuu u qalmaa helitaan la mid ah soo-kabashada aan helay. Taasi waa sababta aan diiradda u saaray bixinta daawaynta bilaashka ah, ee baahida loo qabo, anigoo hagaajinaya wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah ee magaaladayada oo dhan.

Waxaan aaminsanahay in la keeno natiijooyin, ma aha dood aan dhammaad lahayn. Hadday taasi caawinayso ganacsiyada yaryar inay horumaraan ama ay taageeraan machadyada bulshada ku salaysan ee ka dhigaya magaaladeena mid aad u firfircoon.

Caqabadaha ina horyaala waa kuwo adag laakiin si wadajir ah ayaan hormar dhab ah u samayn karnaa. Sharaf bay ii noqon doontaa inaan kasbado taageeradaada si aan u sii wado shaqadan.

*Musharaxani kama qayb galayo Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*